




OHP hadda waxay kafaala-qadaa adeegyo badan oo loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada da'doodu tahay ilaa 21

Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) wuxuu hadda kafaala-qaadayaa dhammaan daryeel caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah iyo caafimaad ahaan habboon ee xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 sano. Tani waxaa kamid ah adeegyada aanay OHP hore u kafaala-qaadin. Barnaamijkan caafimaadka waxa loo yaqaan barnaamijka baarista hore iyo baarista carruurta, Ogaanshaha iyo daawaynta (EPSDT).

- Takhtarka ilmahaaga, khabirka, terabiistaha ama bixiyeha (yaasha) kale ee caafimaadka ayaa tixgelin doona baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga iyo sooyaalkiisa caafimaad si ay u go'aansadaan waxa caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah iyo caafimaad ahaan ku habboon ilmahaaga.
- "Caafimaad ahaan baahi loo qabo" waxaa loola jeedaa daawo loo baahan yahay si looga hortago, loo baaro ama loo daweyyo xaalad. Waxa kale oo ay macnaheedu noqon kartaa daawaynta loo baahan yahay si loo taageero korriinka, horumarka iyo ka qaybgalka dugsiga ama shaqada.
- "Caafimaad ahaan ku habboon" macnaheedu waa in daawadu ay tahay mid badbaado leh oo waxtar leh.
- Adeegyada qaarkood, dhakhtarka ama bixiyaha waxay u baahan doonaan inay u gudbiyaan macluumaadka ururkaaga daryeelka isku dubaridka ah (CCO) ama Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) si loo ansixyo. Xaaladahan, CCO ama OHA ayaa dib u eegis ku sameyn doona si ay u gaaraan go'aamada ku saabsan caymiska.
- Haddii dhakhtarkaagu yiraahdo "OHP ma kafaala-qaadi doonto taas," waxaad codsan kartaa ogeysiis qoraal ah oo diidmo ah. Waa inaad had iyo jeer ka heshaa warqad qoran CCO ama OHA/OHP haddii wax la diido.



OHP sidoo kale:

Waxay ka caawisaa samaynta ballamaha adeegyada.

- Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka ballan kasta, waxaad qof kala hadli kartaa OHP-da. Wuxaa wici kartaa nambarka ku qoran dhabarka kaarka OHP-ga ee ilmahaaga, waxaadna weydiin kartaa inaad la hadasho "isuduwaha daryeelka" ama "Isuduwaha gudbinta" ama:
- Haddii ilmahaagu ku jiro adeega Kaarka Furan (Fee-for-Service) OHP waxaad wici kartaa mid ka mid ah lambaradan si aad isugu duwdid daryeelka:



Hindida Ameerikaanka/ Dhaladka Alaska xubnaha kaarka furan: Ka wac CareOregon [844-847-9320](tel:844-847-9320).

Dhammaan xubnaha kale ee kaarka furan: Ka wac Acentra/Kepro [800-562-4620](tel:800-562-4620).



Haddii ilmahaagu ka diiwaangashan yahay CCO, waxaad ka heli kartaa macluumaadka lagala xariiro ee saxda ah barta oregon.gov/OHA/HSD/OHP/Pages/CCO-Plans.aspx

Waxay dabooshaa safarka lagu aado oo lagaga soo noqdo ballamaha la daboolo, sida:

- Kharashka raacitaanka ambalaasta, baska, tagsiga, ama gaari kale; ama
- Gaaska ku baxa masaafada aad safarto adoo isticmaalaya gaarigaaga.

Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 21 jir ee ka diiwaangashan OHP ayaa hada qayb ka ah barnaamijkaan. Tan waxa ka mid ah kuwa iska diiwaan geliyay Healthier Oregon.



Waxaad wixii dheeri ah ka heli kartaa www.Oregon.gov/EPSDT



KeepCovered.Oregon.gov

Shakhsiyadka naafada ah ama shakhsiyadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daobicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xirir 503-945-5488 (dhammaan wicitaanada gudbinta ee baahiyaha gaarka ah ayaa la bixiyaa) ama feedback@odhsoha.oregon.gov.

PS4-G-EN (12/6/2023) Somali